[shaabbad]
WAAXDA CADDAALADDA
QUI PRO DOMINA JUSTITIA SEQUITUR

**Waaxda caddaaladda MARAYKANKA**

Qaybta Xuquuqda Madaniga ah

*Kaaliyaha Xeer-ilaaliyaha Guud*
*950 Pennsylvania Ave, NW - RFK*
*Washington, DC 20530*

**Bayaanka Kaaliyaha Xeer-ilaaliyaha Guud ee loogu talogelay Xuquuqaha Dadweynaha Eric S. Dreiband**

**Ilaalinta Xuquuqaha Dadweynaha inta laga jawaabayo xanuunka Koronafayras 2019 (COVID-19)**

Iyadoo la tixgelinayo Xaaladda Degdegga ah ee Caafimaadka Dadweynaha ee ku saabsan cudurka coronavirus 2019 (COVID-19) , Qaybta Xuquuqda Dadweynaha ee Waaxda Caddaaladda ee Maraykanka waxay soo saareysaa bayaankan si ay u hubiso in dhibbanayaasha sida sharci darrada ah loogu xadgudbay u ogaadan halka loo jeedsanayo marka Xuquuqdooda Dadweyne lagu xadgudbo.

Takoorka ku saleysan jinsiyada, jinsiga, diinta, asalka dhalashada, naafada, iyo jinsiyadaha kale ee la ilaaliyo waa sharci darro marka loo eego dhowr Sharci oo dawladda dhexe ah waxayna keeni kartaa dambi ama deyn madani ah. Eeg tusaale, https://www.justice.gov/crt/page/file/921291/download. Waxa inta dheer, ficilada xadgudub ee ku saleysan nacaybka kuwan iyo Jinsiyadha kale ee la ilaaliyay waxay jebinaysaa qaanuunada dambiyada nacaybka ee dawladda dhexe. Eeg tusaalaha, https://www.justice.gov/crt/hate-crime-laws.Takoorku wuxuu ka dhalan karaa xaaladdo badan oo kala duwan, oo ay ka mid yihiin waxbarashada, shaqada, caafimaadka iyo badbaadada, guryaynta, iyo meelaha guryaha dadweynaha.

Maaddaama jawaabta celinta adduunka ee faafidda COVID- 19 ay sii soconayso, waaxdu waxay ka taxaddiri doontaa fulinta xeerarka xuquuqda dadweynaha. Waa inaynnu hubinaa in cabsida iyo nacaybka aysan xaddidayn helitaanka guryaha, dugsiyada, dheefaha, adeegyada, shaqooyinka, iyo macluumaadka, iyo waxyaabo kale, inaga oo ku xisaabtamayna isirka, jinsiga, diinta, asalka dhalashada, naafada, ama fasallada kale ee la ilaaliyo. Intaa waxaa sii dheer, helitaanka macluumaadka degdegga ah ee saxda ah iyo macluumaadka caafimaad waa u muhiim siinta dhammaan dadka awoodda u leh in ay gaaraan go'aanno xog ogaal ah oo ay u ilaaliyaan naftooda, qoysaskooda, iyo bulshada guud ahaanba.

**Waa muhiim in aynnu dhammaan wada shaqeyno si aan wax uga qabano takoorka sharci darrada ah, ee ay ka midka yihiin ficillada xadgudub ama hanjabaadaha ku saleysan Jinsiyadaha la ilaaliyo.** Sida dhacda xaaladaha deg-degga ah oo dhan, faafitaanka COVID-19 wuxuu saameeyey dad leh jinsiyado kala duwan, diimo, iyo qowmiyado, iyo sidoo kale kuwa naafada ah. Takooridda sharci darrada ah waxay sidoo kale dadka ka joojin kartaa inay soo baxaan si ay u raadsadaan daaweyn ama macluumaad. **Shuruucda mamnuucaysa takoorka sharci darrada ah waa in si adag looga dhaqangeliya waana loo dhaqangelin doonaa si awood leh.**

**Haddii aad aaminsantahay inaad tahay dhibbane takoor oo ku saleysan isir, jinsi, diin, asalka waddanka, naafada, ama Jinsiyadaha kale ee la ilaaliyo, waxaad ka heli kartaa macluumaad ku saabsan sida aad uga dacwoon karto halkan**

https://www.justice.gov/crt/how-file-complaint **iyo** https://www.justice.gov/crt/fcs**. Cabashooyinka shaqo takoorida waxaa looga dacwoonkaraa EEOC halkan** https://www.eeoc.gov/employees/charge.cfm**. Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa Qaybta Xuquuqaha Dadweynaha si lacag la'aan ah 855-856-1247 ama 202-514-3827. Intaa waxa dheer, Waaxdu waxay macluumaad halkan** https://www.ada.gov **(mawduucyo la xiriira naafada) iyo** https://www.lep.gov **(macluumaadka helidda luqadda).**

**Haddii aad hayso macluumaad ku saabsan dallacaada ficillada xadgudubka ama hanjabaadaha la xiriira isirka, jinsiga, diinta, asalka dhalashada, naafada, ama fasallada kale ee la ilaaliyo, fadlan la xiriir xafiiskaaga FBI-da ee deegaankaaga. Waxaad ka helikartaa liiska goobaha xafiisyada halkan** https://www.fbi.gov/contact-us/field-offices**.**

Waaxda Xuquuqda Dadweynaha ee Waaxda Caddaaladda Maraykanka, oo ay la socdaan Hay'adaha dowladda federaalka , waxay sii wadi doonaan la socodka arrimaha xuquuqda dadweynaha ee la xiriirta COVID-19. Macluumaad inta ka badan, fadlan ka eeg www.justice.gov/crt/fcs. Macluumaad badan oo ku saabsan jawaabcelinta COVID-19 ee dawladda dhexe waxa laga heli karaa halkan Guriga Cad: . Tilmaamaha Koronafayrass ee Maraykanka iyo www.coronavirus.gov.

*Dukumentiyada hagitaanku ma aha kuwo khasab ku ah oo aan lahayn awood iyo saameyn sharciga ah, haddii aan si cad loogu oggolaanin qaanuunka ama si cad loogu daro heshiis, deeq, ama heshiis iskaashi. Iyada oo la raacayo Amarka Wareegtada 13891 iyo Xafiiska Maareynta iyo Miisaaniyadda fulinta qoraal , Waaxdu ma soo xiganayso, ma isticmaali doonto, ama kuma tiirsanaan doonto dukumiinti hagitaan ah oo aan marin Qaybta hagitaanka Waaxda , ama qaybaha hagitaanada kale ee la midka ah ee loogu talogelay Waaxaha iyo Waaxaha kale ee Waaxda Fulinta, marka laga reebo horumarinta xaqiiqooyinka taariikhda ah. marka loo eego xadka dokumenti kasta waxa uu biixinaya heerarka iska wax uqabsada (tusaale ahaan,, dhaqanada lagu taliyay), adeecida heerarkan waa ikhtiyaari, adeecis la'aantuna ma keeni doonto tallaabo dhaqangal. marka loo eego xadka dokumenti kasta waxa uu biixinaya heerarka iska wax uqabsada (tusaale ahaan,, dhaqanada lagu taliyay), adeecida heerarkan waa ikhtiyaari, adeecis la'aantuna ma keeni doonto tallaabo dhaqangal*